AMNESTY INTERNATIONAL

SOOMAALIYA: MUDNAANTA HALA SIIYO ILLAALINTA DADKA NAAFADA AH

AI INDEX: AFR 52/1166/2015

12 MAARSO 2015

© sawirkan waxaa iska leh AFP/ AU-UN ISTPhoto / Tobin Jones

“Inta badan Soomaalidu waxa ay u maleeyaan in dadka naafada ah aanay waxba qabsan karin, oo misana aanay nafsadooda waxba u qaban karin. Waxaan dareemaynaa niyad jab. Waan awoodnaa inaan waxqabano balse wax fursad ah nalooma siiyo arrintaasi. Ma ay jirto cid u dodo xuquuqdayada...Waxaan doonaynaa inaad cabashadayada u gudbisaan caalamka si naloo caawiyo.”

(Xuseen, oo ah naafo ku nool Muqdisho)



©UNHCR/Afgooye Corridor

In ka badan labaatan sano oo ay dagaalo ka socdeen Soomaaliya isla markaana uu xumaa adeega caafimaadka ayaa waxa ay Soomaali badan u horseeday inay ku dhacaan noocyada kala duwan ee naafanimada. Dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya ayaa waxa ay faquuq kala kulmaan qoysaskooda, bulshada iyo dowladda, mana helaan ilaalin dheeraad ah.

Xubno ka socday hay'adda Amnesty International ayaa waxa ay wareysteen tobaneeyo qof oo naafa ah kuwaasi oo ka hadlay xadgudubyo kala duwan oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha oo ay la kulmeen, oo ay ka mid yihiin guur qasab ah, rabshado, kufsi iyo noocyada kale ee xadgudubyada dhanka galmada, xoog ku rarid, caawin la'aan iyo in aanay helin adeegyada asaasiga ah. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa waxaa mas'uuliyad ka saaran inay horumariso, difaacdo oo ay xushmeyso xuquuqda dadka oo dhan, gaar ahaan in si aad ah loo dhowro xuquuqda dadka naafada ah.[1]Dadka naafada ah ayaa waxa ay ugu baaqayaan Dowladda Federaalka Soomaaliya inay aqbasho inay yihiin xubno firfircoon oo ka tirsan bulshada rayidka ah. Waxay doonayaan in lagu matalo bulshada, isla markaana la aqoonsado xuquuqdooda.

Ma jiraan tirakoobyo ama macluumaad wax ku ool ah oo ku saabsan tirada iyo xaaladda dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya. Tirada dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya ayaa waxaa suuragal ah inay ka sareyso qiyaasta[2] caalamiga ah maadaama dagaalka Soomaaliya uu socday in ka badan labaatan sano, islamarkaana ay aad u xumaayeen adeegyada oo uu ka mid yahay adeegga caafimaadka ee inta badan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Xubnaha ururada dadka naafada ah ee la shaqeeya naafada ku nool Soomaaliya ayaa u sheegay xubnaha ka socday hay'adda Amnesty International in tirada dadka ku naafoobay colaadda ay tahay tan ugu badan ee naafada Soomaaliya. [3]Tobaneeyo sano oo ay gudaha Soomaaliya ka socdeen dagaalo iyo howlgallo milateri ayaa waxaa ka dhashay in shacab badan ay waxyeelo soo gaarto. Dad rayid ah ayaa ku dhintay kuna dhaawacmay intii ay socdeen colaadaha la isu adeegsanayay hubka, waxaana ay waxyeeladaasi ay ka soo gaartay sida waxyaalaha qarxa ee la farsameeyo (IEDs), bambooyinka gacmaha laga tuuro, dadka ismiidaamiyo, iyo weliba duqeymaha cirka. Waxaa sidoo kale weli socda dilalka qorsheysan ee loo geysto dadka rayidka ah. [4]Shacabka ku dhinta ama ku dhaawacma weerrarada noocaasi ah ayaa ah kuwa intooda badan aan tiradooda la aqoon, muuqan islamarkaana aan la caawin. Ma uu jiro hannaan lagu dabagalo shacabka ay waxyeelada soo gaarto, inkastoo marar badan uu Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay uu ku tala bixiyay in hannaankaasi la sameeyo, oo ay ka mid

---

[1] Dastuurka kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, 1 Agoosto 2012, Qodobka 11(1, 3), Qodobka 27 (5); waxaa laga heli karaa http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=RkJTOSpoMME= (Waxaa la eegay16.02.15).

[2] 2011-kii Hay'adda Caafimaadka Adduunka ee (WHO) ayaa waxa ay ku qiyaastay in 15% dadka ku nool adduunka ay yihiin naafo. Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO), Warbixinta Naafada Adduunka, 2011, bogga 29. Warbixintan ayaa aheyd tii ugu horreysay islamarkaana ugu waqti dambeysay ee laga qoro naafada adduunka.

[3] Wareysi ay qaadeen shaqaalaha ururka taageerada naafada, 31.01.15, qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga; dood dad kooban, xubno ka tirsan ururada dadka naafada ah, 31.01.15, qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga.

[4]Hay'adda Qaramada Midoobay u Qaabilsan Qaxootiga ee (UNHCR), tixgalinta illaalinta caalami ah oo loo fidiyo dadka ka barakacaya Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliiya, 17 Janaayo 2014, bogga 4 ayaa waxaa laga heli karaa http://www.refworld.org/docid/52d7fc5f4.html (Waxaa la eegay 16.02.15).

tahay baaq gaar ah oo uu Golaha u jeediyay Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya ee (AMISOM) inuu sameeyo hannaankaas. [5]Waxyaabaha kale ee sababa naafanimada ee gudaha Soomaaliya ayaa la sheegay inay xiriir la leeyihiin edeegyada caafimaadka oo xun, iyo naafanimo lagu dhasho.[6] Dadka naafada ah oo ay ka mid yihiin kuwa jir ahaan, maskax ahaan, caqli ahaan ama dareen ahaan mudada dheer naafada u ahaa islamarkaana la kulmay caqabado kala duwan ayaa waxaa suuragal ah inay arrintaa ka hor istaagto in si buuxdo oo wax ku ool ah uga qeyb qaataan howlaha bulshaha si la mid ah dadka kale.[7]

Mudadii baaritaanka laga waday gudaha Soomaaliya intii u dhaxeysay 2013 iyo 2014, ayaa Amnesty International waxa ay la kulantay dad naafa ah oo ku nool xeryaha barakacayaasha kuwaasi oo khatar weyn ugu jiray in xoog lagu raro iyo tacadiyo kale oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha. Xubno ka tirsan Amnesty International ayaa bishii Febraayo ee 2015-ka u safray magaalada Muqdisho ee Soomaaliya, waxayna soo wareysteen 26 qof oo naafa ah, iyo todoba wakiil oo matalayay ururo naafo oo kala duwan, kuwaasi oo la shaqeeya boqolaal qof oo naafa ah oo ku nool magaalada Muqdisho iyo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Sidoo kale Amnesty International waxa ay la hadashay wakiilo ka socday laba bulsho oo ka kooban 390 qoys oo naafo ah oo ku nool magaalada Muqdisho. Xubnaha Amnesty sidoo kale waxa ay la hadleen saraakiil ka tirsan dowladda, iyo weliba wakiilo ka socday hay'adaha caalamiga ah, iyo hay'adaha caalamiga ah ee aan dowliga aheyn.

Dadka ku barakacay Soomaaliya ayaa sanado waxa ay ku qaateen inay kolba meel u guuraan iyagoo ka cararaya colaadda, abaarta iyo macaluusha, waxaana ay wajaheen xaalado aad u adag, si xun oo loola dhaqmay iyo xadgudubyo. Waxa ay maalin walba wajahaan xadgudubyo ka dhan ah aadanaha sida in si sharci darra ah loo dilo, rabshado ay ka mid yihiin kufsi iyo noocyada kale ee xadgudubyada galmada, xoog ku rarid, in aanay helin adeeg caafimaad ama nolol wanaagsan oo ku filan sida hooy, cunno, biyo iyo gargaarka bini'aadamnimo ee soo gaaro oo xadidan.[8] Warbixintan kooban waxa ay hordhac u tahay qaar ka mid ah xadgudubyada gaarka ah ee ay la kulmaan dadka

---

[5] Eeg qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee uu tirsigoodu yahay 2036, Qodobka 17 (2012). Sidoo kale eeg qaraarada 2093 (2013) iyo 2124 (2013), 2158 (2014) iyo 2182 (2014).

[6]Hay'adda Qaramada Midoobay u Qaabilsan Qaxootiga ee (UNHCR), tixgalinta difaac caalami ah oo loo fidiyo dadka ka barakacaya Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliiya, 17 Janaayo 2014, bogga 4 ayaa waxaa laga heli karaa http://www.refworld.org/docid/52d7fc5f4.html (Waxaa la eegay 16.02.15).

[7]Xeerka Xuquuqda Dadka Naafada ah, 2006, Qodobka 1, waxaa laga heli karaahttp://www.un.org/disabilities/convention/conventionfull.shtml (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

[8] Amnesty International ayaa si qoto dheer u diiwaan galisay xadgudubyada iyo tacadiyadaas. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Ma Jirto Meel la Mid ah Guriga: Dib u celinta iyo Dib u dejinta Naafada Soomaaliya, 19 Febraayo 2014, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/001/2014/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); Meelna uma banaano dadka Naafada ah: Bulshada Naafada ah oo Xoog lagu Raray, 13 Sebteembar 2013, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/010/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); Kufsi iyo Xadgudubyada Soomaaliya – waa safmar socda, 30 Agoosto 2013, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/009/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

barakacayaasha ah ee naafada ah, kuwaasi oo ay u dheer tahay tacadiyada ay maalin walba la kulmaan dadka barakacayaasha ah xadgudubyo dheeraad ah oo lagula eegto naafanimadooda iyo inay yihiin dad nugul. Warbixintan kooban ma ahan mid si qoto dheer u falanqeynaysa xaaladda ay ku sugan yihiin dadka naafada ah ee ku nool gudaha Soomaaliya. Balse taa badalkeeda waxa ay hoosta ka xariiqaysaa qaar ka mid ah xadgudubyada ay dadka naafada ah la kulmaan iyadoo ay ujeedadu tahay in indhaha lagu soo jeediyo xaaladooda daran, iyadoo lagu dhiirigalinayo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya inay la tacaamusho dadka naafada ah ayna xaqiijiso difaacooda.

Xubnaha matala ururada dadka naafada ah ayaa waxa ay sheegeen in bulshada Soomaaliyeed ay faquuqaan dadka naafada ah. Xaaladda carruurta naafada ah ayaa u muuqata mid aad u xun. Qaar badan oo ka tirsan wakiilada ururada dadka naafada ah oo la hadlay xubnaha ka tirsan Amnesty International ayaa waxa ay ka warrameen dhacdooyin si toos ah u saameynaya iyaga ama dad ay la shaqeeyeen, oo ay ka mid tahay in qaar ka mid ah carruurta naafada ah loo geystay tacadiyo ama loo arkayay inay culeys ku yihiin qoysaskooda. Qaar ka mid ah qoysaska ayaa gebi ahaanba xiriirka u jara carruurtooda naafada ah. Yuusuf[9], oo xubin ka ah urur dadka naafada ah ay leeyihiin ayaa u sheegay Amnesty International inay hayaan carruur ay soo eryeen reerahoodii. Xaliima, oo 18 jir ah, ayaa ku dhalatay indho la'aan. Hooyadeed ayaa tuurtay markii ay jirtay sanad, iyadoo sabab uga dhigtay inay dhibaato ku noqonayso korinteeda. Xaliima ayaa waxaa meel u dhaw qashin qubka ku tuuray ayeeydeed, balse aabaheed ayaa saacado kaddib soo helay iyadoo dhiman rabta. Xaliima ayaa haatan wax ka barata dugsi ku yaalla magaalada Muqdisho.[10]

Xubanaha Amnesty International ayaa dhowr xubnood oo kala duduwan oo ka socday ururada dadka naafada ah waxa ay u sheegeen in carruurta naafada ah ee la jooga qoysaskooda ay yihiin kuwa la xaqiro, oo aanan loo ogoleyn inay tagaan iskuulada, meelaha ay dadka isugu tagaan ama ay ka qeyb qaataan nolosha bulshada. Tusaale ahaan, Cabaas, oo la shaqeeyo urur ay leeyihiin dadka naafada ah ayaa waxa uu yiri: *"Hab dhaqanka waalidiinta ayaa weli ah mid adag. Waxa ay ilmahooda ku ilaaliyaan guriga, uma ay ogolaadaan inay aadaan iskuulka. Haddii uu wiil yahay waxay u ogolaadaan oo kaliya inuu barto quraanka. Haddii ay gabar tahayna waxay sugaan inta ay uga guurinayaan. Maadaama inta badan waalidka aanay waxba baran, waxay u maleeyaan in haddii aad iskuulka gaysato carruurta aad u adeegsaneyso inaad ku soo tuugsato. Guud ahaan waxaa jiro dayacaad, kala soocid iyo faquuqid badan. Waa inaan wax ka qabanaa aragtidaasi."*

GUURKA QASABKA AH IYO TACADIYADA KA DHACA GURYAHA

Tacadiyada ka dhaca guryaha ayaa la rumeysan yahay inay yihiin kuwo baahsan, inta badan dhaca, isla markaana laga ogolyahay Soomaaliya oo dhan. Sanadkii 2012-ka, baaraha gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan tacadiyada ka dhanka ah haweenka ayaa tiri: "tacadiyada ka dhaca guryaha ayaa ah noocyada ugu badan ee xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha Soomaaliya.... Haddii aanay sababin dhaawac weyn ama dhimasho, tacadiyada ka dhaca guryaha

[9] Dhammaan magacyada lagu adeegsaday dikumintigan waa la badalay si loo ilaaliyo haybta iyo sharafta dadka la wareystay.

[10] Wareysi ay qaadeen shaqaalaha ururka taageerada naafada, 31.01.15, qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga.

ayaan loo arkin dhibaato u baahan in sharciga wax looga qabto ama loo fidiyo kaalmo kale.[11] Waxa ay sheegtay in uu weli jiro guurka qasabka ah, gaar ahaan deegaannada miyiga ah,[12] inkasta oo ay adagtahay in la ogaado baaxadda arrintaasi. "Marka laga hadlayo tacadiyada ka dhaca guryaha, jiritaan la'aanta xog ku saabsan ayaa wax aan suuragal ahayn ka dhigta in la xaqiijiyo xajmiga dhibaatooyinka kufsiga iyo guurka gabdhaha da'da yar ama kan qasabka ah.[13] Inkasta oo aanay jirin macluumaad lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan heerka tacadiyada guryaha ka dhaca iyo guurka qasabka ah, haddana qiyaaso la sameeyay ayaa muujinaya inay yihiin kuwo baahsan.[14]

Xubnaha hay'ada Amnesty International ayaa marar badan arkay in qoysaska leh gabdhaha iyo haweenka naafada ah ay ku qasbaan guur, inta badana ay gabdhahooda u guuriyaan rag waaweyn ama kuwo haweenka dhibaateeya, si qoysaska ay gabdhaha naafada ah cidda uga saaraan uuna uga haro culeyskooda.

Saado, waxa ay ku socotaa lug macmal ah. Waxa ay u sheegtay Amnesty International: "Waalidkey waxa ay ugu qasbeen in aan guursado nin duq ah, waxa ay ii sheegeen in aanay jirin cid i rabto, maadaama aan naafo ahay. 28 jir ayaan ahaa markii la iguursanayay. Ninkana waxa uu ahaa qiyaastii 80 jir. Maadaama ay waalidkey igu qasbeen in aan la noolaado, waxaa ii cadaatay in uu yahay nin xun. Wuu i dili jiray, oo igu qeylin jiray. Wuxuu rabuu igu sameyn jiray. Markasta oo uu i dilo, waxaan u carari jiray guriga waalidkey. Waxayna igu dhihi jireen "Curyaan baad tahay ee ku laabo ninkaaga." Ma aanay i caawin jirin. Mararka qaar waan diidi jiray oo meel kale ayaan aadi jiray, balse way isoo qaban jireen oo ii celin jireen. Mar kastawuxuu isku dayi jiray inuu i dilo, wuu i feeri jiray oo i haraantin jiray. wuu i ceynjin jiray ilaa iyo inta ay indhahayga guduudka ka noqonayaan oo ay iga soo baxayaan. Wax kasta oo guriga yaallo ayuu igu dhufan jiray.Markii dambe waan carari waayay. Haddii aan ehelkiisa caawimaad waydiisto, waxa ay igu dhihi jireen "Walaalkeen

---

[11] Manjoo R 2012, Warbixinta baaraha gaarka ah ee Xadgudubyada ka dhanka ah Haweenka, Waxyaabaha sababo iyo Cawaaqibka ka dhasha: Lagu dara (Howgalka Soomaaliya), Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, Kulanka Labaatanaad, faqrada 17, waxaa laga heli karaa http://daccess-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G12/134/84/PDF/G1213484.pdf?OpenElement (Waxaa la eegay 3 Maarso 2015).

[12] Manjoo R 2012, Warbixinta baaraha gaarka ah ee Xadgudubyada ka dhanka ah Haweenka, Waxyaabaha sababo iyo Cawaaqibka ka dhasha: Lagu dara (Howgalka Soomaaliya), Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, Kulanka Labaatanaad, faqrada 23, waxaa laga heli karaa http://daccess-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G12/134/84/PDF/G1213484.pdf?OpenElement (Waxaa la eegay 3 Maarso 2015).

[13] Manjoo R 2012, Warbixinta baaraha gaarka ah ee Xadgudubyada ka dhanka ah Haweenka, Waxyaabaha sababo iyo Cawaaqibka ka dhasha: Lagu dara (Howgalka Soomaaliya), Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, Kulanka Labaatanaad, faqrada 24, waxaa laga heli karaa http://daccess-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G12/134/84/PDF/G1213484.pdf?OpenElement (Waxaa la eegay 3 Maarso 2015).

[14] Human Rights Watch, "Halkan Kufsigu waa iska Caadi" Qorshayaal shan ah oo looga hortagayo xadgudubyada dhanka galmada ee Soomaaliya, Febraayo 2014, bogga 40, waxaa laga heli karaa http://www.hrw.org/sites/default/files/reports/somalia0214_ForUpload.pdf (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

waxba ha waydiisan, waayo naafo ayaad tahay. Hadduu ku furo maxaad sameyn? Ku mahdi in uu ku qabo." Saado oo laba gabdhood wadata ayaa ninkeeda ka tagtay, waxaana ay bilowday inay tuugsato si ay u noolaato. *"Weli waxaan kasoo kabanayaa dhibaatadii uu ii geystay ninkeyga,"* ayay tiri.

Xannaan waxaynaafooday iyadoo dhallaan ah. Hooyadeedna waxay qabtay qalal, maalin ayey suuxday hooyadeed iyadoo dhabta usaarantaas ookaliftay in ay dab kuwada dhacaan. Hooyadeed gubashadii ayay u dhimatay, Xannaana lugta ayuu dhaawac xun kasoo gaaray, curyaana ay ka noqotay. *"Waxaan ahaa 13 jir, qoyskeygana waxa ay go'aansadeen inay isiiyaan nin, balse waan diiday oo cararay. Qoyskeyga niman ayay iga soo daba direen, kuwaasoo isoo qabtay, gacmaha iyo lugahana iga xiray, waxaana ay qol ii galiyeen ninkii. Dil ayuu igu bilaabay. Qoyskiisa waxa ay ii sheegi jireen in aan naafo ahay, oo aanan caban. Wuu i garaacaa, i haraantiyaa, ina ceynjiyaa. Wuxuu sidoo kale dilaa dadka isku daya inay iga celiyaan. Wuxuu igu dhuftaa gacmihiisa, lugihiisa iyo waxkasta oo uu heli karo. Xataa wuxuu dilaa caruurta. Waxba nama siiyo, oo caruurta anigaa tuugsi ku koriyo. Haddii aan tuugsiga ka haro, wuu i dilaa oo i caayaa. Markaan ka cararo oo qoyskeena aado, eedadey waxa ay ii sheegtaa in aan curyaan ahay, wayna isoo celisaa.*

Maryam waa gabar camoola ah islamarkaana qabta xanuunka qalalka. Waxa ay sharaxaysaa qaabka ay waalidkeed nin ugu guuriyeen iyadoo 14 sano jir ah. *"Markii uu waalidkey ii keenay nin i guursado, waan diiday. Waayo waxaa jiray wiil aan isku da' nahay oo aan jeclaa, balse ay waalidkey diideen oo ay cayriyeen. Waalidkey waxay ii sheegeen inaan kala doorto guurka ama habaar. Haddii aan diido inaan guursado waxaa isoo foodsaari lahaa dhibaatooyin badan, marka ma diidi karin, waxaa qasab aheyd inaan sameeyo waxa ay waalidkey rabeen. Ma aanan garanayn magaca ninka markii aan isguursanaynay. Waxay ii keeneen laba todobaad kaddib. Ma garanayn da'diisa balse waxa uu ku dhawaa 60 jir."* Maryam waxa ay sheegtay in laga mamnuucay inay guriga ka baxdo, ama ay la kulanto dadka kale ee naafada ah *"Maysan doonayn inaan la kulmo ururka dadka naafada ah maadaama aan ka heli karay fikrado aan ninkeyga uga hortago. Ma aanay doonayn inaan ogaado xaqeyga."*

Tacadiyada ka dhaca guryaha iyo guurka qasabka ah ayaa ah kuwa ku baahsan bulshada dhexdeeda, sikastaba haweenka iyo gabdhaha naafada ah ayaa u muuqdo inay wajahaan khatar dheeraad ah taasoo ka dhalata aragtida ah in naafanimadooda ay culeys ku tahay qoskooda, ama ay yihiin kuwa ka qiima hooseeyo haweenka kale islamarkaana lagu xadgudbi karo. Soomaaliya malahan shuruuc dambi ka dhigaysa xadgudubyada ka dhaca guryaha, kufsiga lamaanaha isqaba ama guurka qasabka ah. Hannaanka sharciga oo daciif ah awadeed ayaa tacadiyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha waxaa inta badan la horgeeyaa maxkamadaha shareecada ama kuwa dhaqanka. Tacadiyda ka dhaca guryaha iyo guurka qasabka ah oo ay bulshadu u arkaan kuwa caadi ah, ayaa waxa ay ka dhigaysaa in dhacdooyinka badankood aan la soo sheegin amaba aan la baarin, taasi oo dhalinaysa inay abuuranto xasaanad ku aadan tacadiyada guryaha ka dhaca ee Soomaaliya.

KUFSIGA IYO NOOCYADA KALE EE XADGUDUBKA GALMADA

Kufsiga iyo noocyada kale ee xadgudubyada galmada ayaa ah kuwa ku badan gudaha Soomaaliya, gaar ahaan xeryaha iyo deegaanada ay ku nool yihiin dadka barakacayaasha ah. 2012-kii, baaraha gaarka ah ee xadgudubyada ka dhanka ah haweenka ayaa sheegtay inay ka war hayso warbixino xasaasi ah oo ku saabsan tacadiyada galmada, gaar ahaan kuwa ka dhanka ah haweenka ku nool

xeryaha barakacayaasha ee qeybo ku nool Soomaaliya.[15] Amnesty International iyo ururo kale oo badan ayaa diiwaan geliyay heerar sare oo kufsi iyo tacadiyo kale oo galma ah, gaar ahaan kuwo loo geystay gabdhaha iyo haweenka barakacayaasha ah.[16]

Nolosha qoysaska ayaanan aheyn qaabka kaliya ee haweenka iyo gabdhaha yaryar ee naafada ah ay ku soo gaaraan tacadiyada ay ka midka yihiin kufsiga iyo noocyada kale ee tacadiyada galmada. Naafanimadooda ayaa inta badan horseedi karta in dambiilayaasha ay u arkaan kuwo taag daran, taasina waxa ay kordhisaa khatarta ay ugu jiraan in la kufsado ama loo geysto noocyada kale ee tacadiyada galmada.

Amran ayaa waxaa la kufsaday laba jeer. Waxay u sheegtay xubnaha ka tirsan Amnesty International in markii koobaad ee la kufsanayay lugta xabad looga dhuftay sidaasna ay naafo ku noqotay. Amran ayaa mar labaad la kufsaday laba sano kaddib, maadaama dadka soo weerraray ay ogaayeen naafanimadeeda. *"Waxaan soo kacay habeen barkii, kaddibna waxaan arkay qof soo galay buulkeyga. Qofka isoo weeraray ayaa mindi iga saaray qoorta wuxuuna ii sheegay inaanan hadlin oo uu idili doono haddii aan hadlo. Waan ooyayay maadaama aan ogaa inaanan waxba sameyn karin. Wuxuu ogaa inaan naafa ahay, marka si xiriir ah ayuu ii kufsaday maadaama uu ogaa inaan naafa ahay oo aan iska celin karin."* Amran ayaa tiri *"waxaan rabay inaan dhinto waxaanan u sheegay inuu i dilo...balse carruurteyda ayaan u noolahay."*

Amnesty International ayaa waxa ay la hadashay dhowr haween ah oo loo beegsaday maadama ay naafo yihiin, islamarkaana aad ugu nugul in la kufsado. Ayaan ayaa u sheegtay Amnesty International in kuwa kufsaday ay ugu yeereen eey aan wax qiima ah lahayn naafanimadeeda awgeed.

Farxiyo waxa ay la shaqeysaa urur ay leeyihiin dadka naafada ah. Waxa ayna tiri *"Dhibaatada ay qabaan haweenka naafada ah ayaa ah in haddii la kufsado aanay bulshadu wax u qaban, oo aanay ka hadlin. Uma kacaan sida ay u kacaan markii la kufsado gabar caadi ah. Waxba kama qabtaan arrinta. Haddii la kufsado gabar naafa ah ma jirto cid ka hadasha. Ileen wax qiima ah malahee."*

---

[15] Manjoo R 2012, Warbixinta baaraha gaarka ah ee Xadgudubyada ka dhanka ah Haweenka, Waxyaabaha sababo iyo Cawaaqibka ka dhasha: Lagu dara (Howgalka Soomaaliya), Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, Kulanka Labaatanaad, faqrada 26, waxaa laga heli karaa http://daccess-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G12/134/84/PDF/G1213484.pdf?OpenElement (Waxaa la eegay 3 Maarso 2015).

[16] Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Amnesty International: Kufsi iyo Xadgudubyada Soomaaliya – waa safmar socda, 30 Agoosto 2013, waxaa laga heli karaa: https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/009/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); sidoo kale eeg Human Rights Watch, "Halkan Kufsigu waa iska Caadi" Qorshayaal shan ah oo looga hortagayo xadgudubyada dhanka galmada ee Soomaaliya, Febraayo 2014, bogga 40, waxaa laga heli karaa http://www.hrw.org/sites/default/files/reports/somalia0214_ForUpload.pdf (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); iyo Human Rights Watch, Lahaystayaashii Waardiyayaasha, Maarso 2013, waxaa laga heli karaa: http://www.hrw.org/sites/default/files/reports/somalia0313_ForUpload.pdf (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

Haween iyo gabdho yaryar oo badan ayaa lagu qasbaa inay guursadaan markii ay yaryar yihiin,[17]ama loo guuriyo rag waa weyn oo ku xadgudba haweenka, kaddibna waa la furaa. Caasha ayaa tiri *"Ma aanan dhalin wax carruur ah, waxaa isoo guursaday saddex nin, markii u dambeysay waxaa la i soo furay shan sano kahor. Weligey waxba ma dhalin sidaas ayeyna igu fureen. Ninkeygii ugu dambeeyay wuxuu igu yiri "waxaad tahay naafo aan wax faa'iida ah laheyn, sideen kuu xanaaneyn karaa – sidaa tahay iska ahow." Ninkaas saddex sano ayuu i qabay, markii uu i furayna waxba iimuusan reebin, xitaa joodari iigamuusan tegin. Oo wuxuu yiri "waxaad tahay naafo, qof kuu baahanna ma jirto ee i dhaaf."*

Amran waxay tiri *"Waxaan dhalay saddex canug oo kala aabe ah. Way i shukaansadaan waxayna ii sheegaan inay i jecel yihiin. Markii ay i arkaan inaan uur ahayna waa ay i furan. Way iga tagaan iyagoo aanan rabin canug ay u dhashay naag naafa ah."* Canuga ugu yar Amran ayaa shan bilood jira.

Qaababka lagu heli karo cadaalad ayaa aad u yar. Inta badan haweenka la kufsaday ee ay Amnesty International la hadashay ayaanan booliska u sheegin dadka kufsaday, inta badan ayagoo ka baqaya in la faquuqo, kalsooni yarna ku qaba awoodda ay booliska ku baari karaan ama ay uga difaaci karaan aargoosi, ama haweenka oo aanan haysan taageerada qoyskooda. Hab-dhaqanka booliska iyo faquuqa ku aadan tacadiyada galmada ee ka dhexjira bulshada Soomaalida ayaa ka niyad jabiya dhibanayaasha inay sheegaan kiisaskooda. Qaar ka mid ah haweenka sheegay in la kufsaday ayaa loola dhaqmay sidii dambiilayaal.[18]

Dalalka ayaa waxa ay mas'uuliyad ka saaran tahay inay baaraan oo ay maxkamadeeyaan dambiyada noocaasi ah haddii dadka gaystay ay yihiin qaar ka tirsan ciidammada ama kuwa kale. Marka maamulka dowladda uu og yahay ama ay tahay inuu ogaado tacadiyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha ee ay galeen dadka aan dowladda ka tirsaneyn, islamarkaana ay ku guuldareysato inay tallaabo ku haboon u qaaddo si ay uga hortagto, u baarto, ayna ula xisaabtanto dambiilayaasha geystay dambiga, dowladda ayaa si lamid ah dambiilayaasha waxa ay qaadaysaa mas'uuliyadda xadgudubyada xuquuqda aadanaha.

---

[17] Tani waxaa laga tarjumay gabdhaha ay da'dooda ka bilaabato 13 sano.

[18] Tusaale ahaan eeg warsaxaafadeedka ay sida wadajirka ah u soo saareen, Amnesty International, Human Rights Watch, Committee to Protect Journalists, ee ahaa Siidaaya weriyaha iyo kuwa sida sharci darrada ah loo xiray, 23 Janaayo 2013, waxaa laga heli karaa: http://www.hrw.org/news/2013/01/22/somalia-free-journalist-others-unlawfully-detained (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

XOOG KU RARID, SI XUN UGA FAA'IIDEYSASHO IYO HELITAANKA KAALMADA

UNHCR/R. Gangale

Dad badan oo naafo ah ayaa ku nool xeryaha barakacayaasha. Inta badan barakacayaasha ku nool Muqdisho waxa ay ka yimaadeen deegaannada ay colaadaha ka jirtaan, gaar ahaan gobolada Baay, Bakool, Jubadda Hoose iyo Jubadda Dhexe.[19]Qaar kalena waxa ay ugu noolyihiin xeryaha barakacayaasha si ay uga baxsadaan xaaladdo tacadiyo ah sida kor lagu soo sharaxay.

Khatarta ah in la raro ayaa marwalaba dul taagan barakacayaasha ku nool Muqdisho iyo qeybaha kale ee Soomaaliya. Sanadihii la soo dhaafay, tobonnaan kun oo barakacayaal ah ayaa xoog looga raray dhul ay dowladda leedahay iyo mid gaar loo leeyahay oo ay Muqdisho ka degnaayeen.[20] Barakacayaasha Soomaaliya ayaa waxaa si xun uga faa'iideysto oo ku takri falo dad loo yaqaano waardiyayaal, oo ah shakhsiyaad iyo kooxo awood badan leh, inta badana xiriir la leh gudoomiyayaasha degmooyinka, iyo qeybaha kale ee dowladda hoose ama maleeshiyaad, kuwaasoo isaga dhiga barakacayaasha inay leeyihiin dhulka xeryaha ku yaallaan. Waardiyayaasha oo ka faa'iideysanaya jiritaan la'aanta maamul rasmi ah oo ay leeyihiin xeryaha ammaan darrida awgeed, ayaa qaata dowrka maamulayaasha xeryaha, waana ay ku faa'iidaan. Galaangalka ay u leeyihiin

---

[19] Wareysi ay qaadeen shaqaalaha ururka taageerada naafada, 31.01.15, qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga.

[20]. Xoog ku rarida ayaa Muqdisho ka socotay tan iyo 2012-kii. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Ma Jirto Meel la Mid ah Guriga: Dib u celinta iyo Dib u dejinta Naafada Soomaaliya, 19 Febraayo 2014, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/001/2014/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); Meelna uma banaano dadka Naafada ah: Bulshada Naafada ah oo Xoog lagu Raray, 13 Sebteembar 2013, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/010/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015).

dhulka ayaa awood u siiya inay xukumaan barakacayaasha, ayna weeciyaan gargaarka. Helitaanka gargaar bani'aadannimo ay helaandadka u baahan ee ku nool Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa weli ah mid adag. Sababaha arrintaasi keeno ayaa waxaa ka mid ah gargaarka oo la weeciyo, ammaan darri, xanibaadda gargaarka iyo weerarro ka dhan ah shaqaalaha gargaarka iyo howlgaladooda.[21]

Dadka naafada ah ayaa sidoo kale wajaha xoog ku rarida, waxaana ay khatar weyn ugu jiraan tacadiyada sida ka faa'iideysiga iyo xadgudubyada kale. Waxaa intaa u dheeree inay wajahdo helitaan yari dhanka gargaarka ah. Xubnaha Amnesty International ayaa Muqdisho kula kulmay laba bulsho oo dad naafo ah, kuwaas oo deegaan ahaan isu dhawaa, isla markaana is caawinayay.

BULSHADA DADKA INDHOOLAYAASHA AH

Amnesty International ayaa la kulantay koox indhoolayaal ah, oo xilligii ay jirtay abaartii Geeska Afrika ee bilaabatay 2010-ka, ku dhex noolaa barakacayaasha kale ee Muqdisho.[22] Xuseen oo ka mid ah indhoolayaasha ayaa yiri: *"dhibaatada aan ku dhex qabnay dadka kale ayaa ahayd in marka mucaawino la keeno, aan dadka indhoolaha ah waxba la siin jirin. Marka ay dadka kale mucaawinada doonanayaan, waxaan iska joogi jirnay guryaha, mana jirin cid na caawin jirtay."*

Jibriil ayaa sharaxay sida ay qoysaska indhoolaha ugu adkeyd inay helaan mucaawino: *"Inta badan marka mucaawinada la keeno, xaasaskeena ma aanay awoodin inay qeyb ka helaan, maadaama dadka ay awood isticmaali jireen, xaasaskana ay ahaayeen kuwa taag darran, caruurtoodana yaryar yihiin. Sidoo kale ma aanan ogaan jirin marka ay muwaacinada imaneyso. Marka xaasaskeena iyo caruurteena ayaa waqti hore mucaawinada dooni jiray, dadkeena indhoolaha ahna waxaa nalooga tagi jiray guryaha. Marka haddii ay mucaawino timaado, waa lagu kala ordi jiray, waxna nooma hari jirin."*

Cunnada iyo kaalmada kale ee ay helaan indhoolayaasha ayaa inta badan laga xadi jiray. Sababtaasi

---

[21] Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Amnesty International, Ma Jirto Meel la Mid ah Guriga: Dib u celinta iyo Dib u dejinta Barakacayaasha Soomaaliya, 19 Febraayo 2014, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/001/2014/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); Meelna uma banaano dadka Barakacayaasha ah: Bulshada Barakacayaasha ah oo Xoog lagu Raray, 13 Sebteembar 2013, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/010/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015);

[22] Geeska Afrika ayaa waxaa ka dhacday abaar xilliyeed iyo cunno yari. 20-kii July 2011-ka, Qaramada Midoobay ayaa ku dhawaaqday macluul xaaladda sii xumaaneysay awgeed. Balse calaamadaha digniinta ah ayaa jiray laga bilaabay sanadkii 2010-ka, barakaca abaartana waxa uu bilowday 2010-ka. Abaarta ayaa saameysay in ka badan 13 milyan oo qof, waxaana ku barakacay ku dhawaad saddex meelood meel shacabka Soomaaliya. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Hay'ada Laanqeyrta Cas, Abaarta Geeska Afrika: Ka hortaga musiibadda xigta, 2011, waxaa laga heli karaa http://www.ifrc.org/PageFiles/90410/1203800-Drought%20in%20the%20Horn%20of%20Africa-Preventing%20the%20next%20disaster-EN-LR.pdf (Waxaa la eegay 03.03.15).

ayaa dhalisay in sanadkii 2011-ka ay koox indhooleyaal ah isku meel degaan. Xuseen ayaa yiri: *"Sababta aan u sameysanay xerada gaarka noo ah ayaa ah baahida aan qabno haddii aan nahay indhoolayaasha iyo dhibaatooyinka badan ee aan kala kulano dadka indhaha leh. Marka xilligii ay abaarta jirtay ayaan go'aansanay in aan isu nimaano oo aan iscaawino. Dadka indhoolaha ah kuma dhex noolaan karaan dadka indhaha leh, maadaama aanay caawineynin, oo aanay daryeeleynin, dantoodana ay ilaashadaan. Maadaama aan indhooleyaal nahay, waan iscaawinaa, isma dhibno, waan isu roonahay, waxaana isku daynaa in aan isu wanaagsanaano. Waxaan matelnaa baahida guud ee indhoolayaasha dalkan. Marka waxaan aadnay degmada Wadajir, waxaana kireysanay dhulkan. Bil waliba kiro ayaa nalaga rabaa."*

Sida inta badanba ku dhacda dadka ku nool xeryaha barakacayaasha, indhoolayaasha ayaa laga faa'iideystaa oo lagu takri falaa. Sanadkii 2011-ka, waxa ay la heshiiyeen milkiile dhul oo ku sugan degmada Wadajir ee Muqdisho, si ay uga kireeyaan dhul ay indhoolayaasha isula degaan. Xubnaha bulshada indhoolayaasha ayaa u sheegay Amnesty International in bishiiba ay kiro ahaan u bixiyaan lacag u dhexeysa 100 doolar ilaa 150 doolar, haddii kalena ay raashinka mucaawinada u helaan siiyaan milkiilaha. Jibriil ayaa *yiri "Kirada laba nooc ayaan ku bixinaa. Marka aan helno cunno deeq ah, kala bar ayaan kirada ku bixinaa. Marka aan wax cunno ah helin, waxaan iska bixinaa lacag. Markii hore waxaan ahayn 50 qoys, kaddibna waxaan noqonay 120 qoys, maadaama ay nala soo degeen indhoolayaal kale oo na maqlay."*

Bulshada indhoolayaasha ayaa dareemay in isu imaadkooda ay waxbadan u tartay oo ay iscaawin karaan. Si kastaba waxa ay sheegeen in markii hore ay dayaceen hay'adaha gargaarka iyo dowladdaba, oo aanay wax deeq cunno ah ka helin. Sidoo kale waxaa ay u nuglaayeen khatarta dibedda. Jibriil ayaa yiri: "*Ammaanka xerada ayaa ahaa mid xun.Mararka qaar waxaa inoo soo dhici jiray tuugo, waxayna naga dhici jireen waxaan haysano. Waxaa dhacda in marka xerada laga dhisayo musqulo ama cooshash ay burcad baad naga qaadaan, iyaga oo noogu hanjabaya in haddii aan baadda bixin weyno ay naga burburinayaan. Dhaca ayaa ahaa joogto, waxaana ay naga dhici jireen wax kasta oo ay telefoonnada ka midka yihiin. Mararka qaar lacag ayaan siin jirnay si ay noo dhaafaan. Todobaad gudihiis waxaa nala dhici jiray laba ama saddex jeer. Marka mucaawino naloo keeno, isbaaro ayay u dhigan jireen, waxayna naga dalban jireen in aan bixino baad. Hub iyo xoog ayay noo adeegsan jireen, mararka qaarna rasaas ayay nagu ridi jireen."*

Cismaan ayaa sharaxay dhacdo rabshad wadatay oo ku dhacday 2013-kii: *"Habeen ayaa waxaa noo soo dhacay tuug mindiyo wadata, wayna na dheceen. Waxay naga qaateen dharkeena iyo waxkasta oo aan haysanay. Nalama aanay hadlin, maadaama ay ogaayeen in aan wax arkin. Habeenkaasi dhulka ayay igu rideen, waxayna qaateen dharkeyga iyo kuwa dadka kale."*

Xubnaha xerada ku nool ayaa sheegay in dadka weerarka kusoo qaaday ayay marar badan isku dayeen inay kufsadaan haweenka indhoolayaasha ah, balse ay iska difaaceen iyaga oo is kaashanayay. Sanadkii 2013-kii, kaddib dhacdo rabshad wadatay, mas'uul ka tirsan dowladda hoose ayaa ilaalo u sameeyay xerada. Waxa uu ciidammadiisa ku amray in saddex goor ay maalintii kormeeraan xerada. Xubnaha xerada ku nool ayaa sheegay in wixii markaa ka dambeeyay ay ammaan dareemeen, ayna hoos u dhaceen weerarrada tuugada uga iman jiray. Balse ilaalada ayaa meesha ka baxday markii ay indhoolayaasha u guureen dhul cusub bishii July ee 2014-ka.

Intii lagu jiray lixdii bilood ee ugu horreysay 2013-ka, waardiyaha dhulka indhoolayaasha laga kireeyay ayaa ku amray inay guuraan. Anisa ayaa tiri: "Xilligaasi wax deeq ah ma aanan helaynin.

Waardiyaha ayaa inoo sheegtay maadaama aanan wax mucaawino ah jirin in aan ka guurno, waxayna noo keentay maleeshiyadeeda, iyadoo noo sheegtay inay xoog nagu rari doonto haddii aan diidno. Waxaan ka codsanay inay lacagta naga sugto, balse way diiday."

Sanadkii 2013-ka oo dhan, waardiyayaasha dhulka ayaa cadaadis ku saarayay indhoolayaasha inay guuraan, iyaga oo maleeshiyaad usoo kaxeysanayay. Taasi ayaa dhalisay in qoysaska qaar ay u guuraan meelo kale oo uu ka mid yahay marinka Afgooye, oo ah meel Waqooyi Galbeed kaga began bartamaha caasimada, halkaasi oo loo raray kumannaan qof oo barakacayaal ah. Bishii November ee 2013-ka, taliyaha booliska iyo wasiirkii wasaaradda arrimaha gudaha iyo ammaanka qaranka ee xilligaa, ayaa ku guuleystay inay hakiyaan amar xoog loogu rari lahaa indhoolayaasha. Balse waardiyayaasha ayaa sii waday inay guuritaan bulshada cadaadis ku saaraan.[23]

Sanadkii 2013-kii, bulshada indhoolayaasha ayaa ku guul dareystay inay kaalmo ka helaan hay'ad samafal ah, si ay u iibsadaan dhul. Kaddib waxa ay go'aansadeen inay qoyskiiba ka qaadaan 50 doolar si ay u iibsadaan boos kale oo ku yaallay isla deegaankaasi. Qaar ka mid ah qoysaska ayaa lacagahaasi ka bixiyay lacago loogu deeqay. Xuseen ayaa yiri: "Lacagta ayaan ururinay, waxaana iibsanay dhul aan leenahay oo aan degno.Waxaa yaraaday qoysaska ka qeyb qaadatay bixinta lacagta dhulkalagu iibiyay. Ku dhowaad 70 qoys ayaa bixiyay lacagta." Waxa ay dhulka ka iibsadeen waardiye kale, iyaga oo ka siistay 1500 oo dollar, lacagta soo hartayna waxa ay u adeegsadeen dhisida musqulo iyo guuritaankooda.

Bulshada indhoolayaasha ah ayaa og in dhulka ay iibsadeen aanu sharci ahaan lahayn milkiilaha ka iibiyay. Balse waxa ay rumeysan yihiin in sidan ay u dhaanto sidii hore ee kirada laga qaadi jiray, ayna khatarta ugu jireen in si xoog ah lagu raro. Waxa sidoo kale farxad u ah in dhulka uu ku yaallo dibedda xaafad, taasina ay yareyneyso khatarta uga iman karta burcada. Jibriil ayaa yiri: *"Dhulkan waa mid kumeel gaar ah, inta uu kaga baahanayo qofka iska leh, waan iska degnaaneynaa.Kaddibna waan uga guureynaa. Ma haysano wax dukumiinti ah, balse lacag ayaan ka bixinay dhulka. Ugama guureyno qof aan ka ahayn milkiilaha saxda ah."* Bulshada ayaa dhulkan kusoo guurtay July 2014, sanad kaddib markii ay bilaabeen inay lacagta keydsadaan. "*Ma aanan helin wax kaalmo ah. Dhulkanagan cusub waxaan ka dhisanay musqulo iyo goobo biyo oo aan leenahay. Dhibaatada ugu weyn ayaa ah in dhulka uu yaryahaya oo ciriiri nagu yahay."* Cabirka dhulka ayaa dhan 35 mitir X 15 mitir.

DEEGAANNADA HAWEENKA NAAFADA AH

Koox haween naafa ah[24] ayaa sidoo kale sanado ku qaatay inay marba meel u guuraan, kaddib markii dhowr jeer xoog lagu raray. Waxa ay ka guureen marinka Afgooye iyagoo degay degmada Hodan ee Muqdisho sanadkii 2009-kii, kaddib markii xoog lagu raray. Haweenka ayaa dhul ku yaalla marinka Afgooye dhistay, waxaana ay ka taagteen cooshash iyo musqulo, kaddibna milkiilaha dhulkaasi ayaa u sheegay in aanu lacagtooda rabin oo ay ka guuraan. Waxa ay sidoo kale dhisteen dhul ku yaalla degmada Hodan oo ay musqulo ka taagteen, balse kirada ayaa sii kordheysay. Saado ayaa tiri: *"Waxaa naloo sheegay in aan ka guurno dhulkii aan ka degneyn degmada Hodan, maadaama dadkii*

[23]Xiriir dhanka email-ka oo ay sameeyeen shaqaalaha UNHCR ee Soomaaliya, 01.08.2014.

[24]Kooxda haweenka naafada ah ayaa matala 270 qoys oo ku nool deegaano kala duwan isla markaana istaageera.

lahaa ay rabeen inay isticmaalaan. Kiro ayaan bixineynay oo ma aanan awoodin in aan iibsano, marka waan ka guurnay." Qaar ka mid ah haweenka oo awooday inay kirada qaaliga ah iska bixiyaan ayaa sii degnaa, balse waxaa marwalba loogu goodin jiray in la rarayo. Caasho ayaa tiri *"Waan ooyaa marka la joogo dhammaadka bisha oo aan lacag haysan.Milkiilaha dhulka aan deganahay ayaa dhowr jeer iigu hanjabay inuu i rarayo. Wuxuu ii sheegaa in haddii aan kirada bixin waayo dibedda la ii saarayo. Wax naxariis ah umuu hayo dadka naafada ah. Bil kasta waxa uu iigu hanjabaa inuu i rarayo."*

Haween badan ayaa si xoog ah looga raray degmada Hodan sanadkii 2012-ka, maadaama ay bixin waayeen kirada qaaliga ah ee lagu dalacay. Leyla waxa ay naafo ka tahay gacmaha. Waxa ay tiri: *"Ganacsatada ayaa guryo ka dhisi rabay halkaasi, shan ka mid ah ayaa qoryo soo qaatay, mid ka mid ahna waxa uu bilaabay in uu dhulka cabiro. Waxa ay ii sheegeen "haddaad rabtid gurigaaga afka ku qaado ee meeshan ka guur."Waxa ay ii sheegeen "curyaan baad tahay ee agteena kuguma arki rabno ee iska guur."Subax ayay inoo yimaadeen, aniga oo quraac diyaarinaya. Way noo hanjabeen waxa ayna burburiyeen dhowr guri. Habeenkaasi bannaanka ayaan seexday, maalinkii xigeyna waan guuray. Wax naxariis ah uma aanay gelin haweenka naafada ah. Rasaas ayay naga dul rideen. Dadka qaar ayaa alaabta gacmahooda ku qaatay. Waxay nagu dheheen, "dadkiina naafada ah, wax naxariis ah hanaga sugina, guura, wax nasiib ah halkan kuma lihidiin, ka guura."*

Kaddib markii xoog looga raray Hodan, haweenka ayaa lacag isku ururiyay, waxaana ay dhul ka kireysteen degmada Dayniile ee Muqdisho. Farxiya ayaa Amnesty International u sheegtay: *"Dhulka ayaa kireysanay, waxaana ka dhisnay musqulo iyo cooshash. Balse 2014 ayaa waardiyaha waxa uu inoo sheegay in aan ka guurno. Inta badan waxaan nahay haween garoobo naafo ah oo cidahooda u xamaasha. Waa mid nagu adag."* Xannaan ayaa sheegtay in kirada Dayniile ay markii hore ahayd 5 doolar qoyskiiba, haddana ay tahay 20 doolar, ayna dad badan ka guurayaan. Farxiya ayaa intaa ku dartay in haweenka uu ku adagyahay guuritaanka, maadaama curyaanimadooda aanay u sahleyn inay alaabta rartaan.

Haweenka qaar ayaa xoog rabshad wata lagu raray. Faaduma ayaa sheegtay in dableyda waardiyaha ee Dayniile *"...way noo yimaadeen oo na handadeen, iyaga oo dalbanaya in aan kirada bixino. Saddex jeer ayay iga burburiyeen teendhada, dib ayaana ka dhistay. Wey dumiyaan iyaga oo aan kuu sheegeynin."*

Zamzam ayaa sheegtay in July 2014-kii *"...waardiyaha ayaa dabley badan la yimid. Waxa uu naga qaadan jiray nooliga bil kasta deeq ahaanta naloo siiyo. Markii nooliga naga joogsaday, waxa uu sheegay in aanay waxba ka gelin, wuxuuna bilaabay inuu burburiyo alaabteena."*

Safiya waxa ay tiri *"Marka hore waa ay noo hanjabeen, waxayna nagu dhaheen "Haddii aadan alaabtiinna qaadan caawa waad arki doontaan." Way naga tageen balse waxa ay soo laabteen isla habeenkii waxayna nagu sameeyeen wax aad u xun. Waxaa noosoo galay afar nin oo wejiga soo xirtay, oo waxay rabeen inay kufsadaan gabadheyga balse ninkeyga ayaa qeyliyay oo isku dayay inuu naga difaaco, marka way dileen. Waan argagaxay markii aan arkay maydka ninkeyga. Gabadheyda oo oynayso ayey kaxaysteen wayna soo kufsadeen. Kaddibna raggii waa ay carareen. Subaxii xigay ayey noo yimaadeen waxayna burburiyeen buulasheennii. Ma garan karo inay isku mid ahaayeen raggii maalinta noo yimid iyo kuwii habeenka, maadaama ay wejiga soo xirteen habeenkii. Waxaan la fajacsanaa waxa nagu dhacay marka ma xasuusan karo inta ay aheyd tirada ragga buulasha duduminayay maalintaas. Balse waxaan xasuustaa qaabkii ay iigu sheegayeen inaan guuro.*

Dhammaan cooshadaheygii waa la burburiyay oo dhulkaa la dhigay. Zamzam ayaa ayaa intaa ku dartay in milkiilayaasha aanay burburin dhammaan cooshashka oo waxaa jiray barakacayaal deganaa meel u dhaw meesha oo cooshashkooda degdeg ku furfurtay markii ay arkeen waxa dhacayay: *"Waxaan go'aansannay inaan guurno, maadaama milkiilaha uu soo laaban karay uuna burburin karay cooshashkeenna oo dhan, marka waxaanu ku qasbanaanay inaanu guurno."*

Saado ayaa tiri: *"Markii ugu dambeysay ee nalagu amray inaan guurno waxa ay aheyd Diseembar 2014-kii. Tuugsi ayaan aaday oo waxaan isu diyaarinayay inaan guuro. Maadaama aan nahay haween naafa ah nooma diir naxaan. Haddii uu deegaanku wanaagsan yahay waa ay na raraan. Waxay nagu dhahaan haweenka naafada ah waxba ma qabtaan "Waxba idinkama faa'iidayno, waxba ma qaban kartaan marka waa inaad guurtaan." Way nagu xad gudbaan, waxayna noo sheegaan inaan guurno markaan helno kaalmo ama qaab aan ku guuri karno. Marwalba waxa ay fariinta u soo dhiibaan dableyda. Markii ugu dambeysay ee ay dableyda inoo timid waxa ay ahaayeen afar ilaa shan nin. Waxa ay wateen qoriga AK47. Nama aanay dilin ama garaacin balse waa ay noo hanjabeen. Bil bil ayey noogu iman jireen waxayna na waydiin jireen sababta aan weli u deggannahay, iyagoo nagu amri jiray inaan guurno."*

Dowladda iyo milkiilayaasha dhulka ayaa waxa ay sii wadaan inay xoog ku raraan dadka. Amnesty International ma ogo wax faragelin ah oo ay dowladda ku sameynayso xoog ku raridda, markii laga reebo bulshada indhoolayaasha ah. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa la sheegay inay 2014-kii ay qaadatay siyaasad ku aaddan dadka ku barakacay gudaha, taasi oo qeexaysa ilaalinta barakacayaasha Soomaaliya, oo ay ka mid tahay kahortagga raridda xoogga ah.[25] Inkastoo tallaabadaasi ay tahay mid wanaagsan ayaa haddana dowladdu waxaanay weli xaqiijin joojinta xoog ku raridda iyo in dadka laga difaaco raritaanka qasabka ah. Waxaa intaa dheer in tallaabooyinka looga hortagayo raritaanka qasabka ah la sharciyeeyo oo la fuliyo.

Leyla ayaa waxa ay u sheegtay xubnaha Amnesty International inay ku laabanayso marinka Afgooye halkaasi oo uu ka jiro walaac dhanka ammaanka ah. *"Waxaan u guurayaa bannaanka Muqdisho, waxaana ka walwalsanahay ammaanka halkaas oo haweenka lagu kufsan karo. Meesha aan ku noolaan rabo waxaan u cabsi qabaa sida nolosheyda ay noqon doonto, waxaan ka cabsi qabaa in la i kufsado."* Leyla ayaa sheegtay inay ka badbaadday isku day kufsi iyadoo deegaankaasi ka dhisanaysa buulkeeda cusub *"Waxaa jirtay maalin aan doontay xaabo xilligaasi oo aan halkaa ka dhisayay buulkeyga. Nin ayaa isku dayay inuu i kufsado balse kuma uusan guulaysan, laba nin oo kale ayaa na aragtay oo cayrisay. Waxay aheyd labadii bilood ee la soo dhaafay [Diseembar 2014] markaasi ayaa waxaan isku diyaarinayay inaan guuro."* Safiya ayaa muujisay cabsida ay ku dareemaan deegaankooda cusub: *"Markaan bannaanka u baxno [tusaale ahaan si aan u soo dhaansanno biyo], koox ayaan isku raacnaa. Sidaas oo ay tahayna cabsi ayaan dareemaynaa. Waxaan qaadanaa tooriyo iyo budad si aan isugu difaacno."*

Barakacayaasha ku nool magaalada Muqdisho iyo qeybaha kale ee Soomaaliya ayaa waxaa xadidan sidii ay ku heli lahaayeen adeegyada ay ku heli lahaayeen biyaha, musqulaha iyo adeegyada

[25]Wareysi lala yeeshay, wakiilada hay'adaha caalamiga ah 30 Janaayo 2015.

caafimaadka.[26] Dhibaatada ayaa ku sii badan dadka naafada ah markii loo eego barakacayaasha intooda kale, waxaana xadidan awoodda ay ku gaari karaan adeegyadaasi iyo nooligooda kale. Dowladda ayaa waxa ay mas'uuliyad ka saaran tahay inay xaqiijiso in dadka ay helaan nolol heer ku fialn ah, oo ay ka mid tahay helitaanka fayadhowr ku filan.[27] Waxaa intaa dheer in dowladda ay mas'uuliyad dheeraad ah ka saaran tahay inay biyo ama qalabka biyaha gaarsiiso dadka aan heli karin gaar ahaan kuwa ay xadidan tahay awoodda ay ku heli karaa xaqqa ay u leeyihiin biyaha.[28]

Haweenka naafada ah ee barakacayaasha ah ee ay Amnesty International la hadashay ayaa sheegay in deegaanka ay ku nool yihiin ee marinka Afgooye uu leeyahay hal musqul oo ay wadaagaan 100 qoys oo halkaasi deggan, isla markaana ay masaafa dheer u lugeeyaan si ay biyo usoo dhaansadaan.[29]Waa deegaan 15km u jiro magaalada Muqdisho waxaana ay taasi ka dhigan tahay in haweenkaasi oo caqabad kala kulma isu socodka ay dhib kale oo dheeraad ah kala kulmaan fogaanta ay ka fog yihiin magaalada. Leyla ayaa tiri: *"Waxaan aad u ga walwalaa guuritaanka iyo sidii aan nolosheyda u maareyn lahaa. Ma sahlana inaad meel ka guurtid, balse arrintaa cid dan ka leh ma ay jirto."* Xannaan ayaa u sheegtay xubnaha Amnesty International: *"Waxaan ka tuugsan jiray Xamar Weyne. Subaxii alaaseydii ayaan iman jiray si aan basaska uga tuugsado, oo aan wax u raadsado, wixii aan helana cunto ayaan ku iibsan jiray oo guriga ayaan ula laaban jiray.* Hadda 30 daqiiqo ayuu basku u socdaa guriga, oo Dayniile ayaa noo dhaw. *"Zamzam ayaa tiri markii aan ku nooleyn Dayniile waxaa noo dhawaa suuqa oo alaabteenna si fudud ayaan u iibin jirnay hadda wuu naga fog yahay waana arrin nagu adag."*

Farxiyo ayaa Amnesty International u sheegtay in haweenka ay ka cabsi qabaan in xoog looga raro deegaanka cusub ee ay ka degan yihiin marinka Afgooye. Waxa ay tiri: *"Wax xuquuq ah malahan dadka naafada ah oo meelna noogama bannaana bulshada dhexdeeda, marka hadba meel ayaan u guurnaa."*

Dadka naafada ah ayaa qeexay sida inta badan ay ugu adag tahay inay raacaan basaska, maadaama ay darawalada ay rumeysan yihiin in naafada aanay lacag bixinayn ama waqti badan ay ku qaataan

---

[26]Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg Amnesty International, Ma Jirto Meel la Mid ah Guriga: Dib u celinta iyo Dib u dejinta Barakacayaasha Soomaaliya, 19 Febraayo 2014, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/001/2014/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015); Meelna uma banaano dadka Barakacayaasha ah: Bulshada Barakacayaasha ah oo Xoog lagu Raray, 13 Sebteembar 2013, waxaa laga heli karaa https://www.amnesty.org/en/documents/AFR52/010/2013/en/ (Waxaa la eegay 6 Maarso 2015);

[27]Eeg Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, Guddigiisa Xuquuqda Aadanaha, kulanka 12-aad, ajandaha qodobka 3-aad, Horumarinta Dhammaan Xuquuqda Aadanaha, Rayidka, Siyaasadda, Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, oo ay ka mid tahay Xaqqa Horumarinta: Warbixinta Khabiirka Madaxa Banaan ee Arrimaha Xuquuqda Aadanah iyo Waajibaadka la xiriira Helitaanka Biyo nadiif ah oo la cabo iyo Fayadhowr, Catarina de Albuquerque, UN Doc.A/HRC/12/24 (2009), 13-54.

[28]Guddiga Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Faallada Guud 15, 25.

[29]Haweenka ayaa u sheegay xubnaha Amnesty International in ilaa iyo laba saac u socdaan si ay biyo usoo dhaansadaan.

koritaanka iyo ka degidda basaska. Muuse ayaa yiri *"Meelkasta oo aan aadno dadka si xun ayey noola hadlaan. Marka aan rabno inaan dukaamada wax ka iibsanno waxaa naloola dhaqmaa sida dadka tuugsado. Haddii aan rabno inaan bas raacno nooma joogsadaan, iyagoo u malaynaya inaan bilaash ku raaci rabno. Markii nala raray milkiilaha ayaa yiri: "Haddii aad guuri waydaan waxaan gubayaa meesha si dadkiina naafada ah dhammaantiin aad ugu gubataan." Qaar ka mid ah naafada ayaa waxaa laga burburiyay buulashooda. Waxayna yiraahdaan "Waan necebnahay dadka naafada ah,"* Tani waxa ay saameyn ku leedahay haweenka haatan u guuray bannaanka magaalada gaar ahaan awoodda ay u leeyihin inay noloshooda maareeyaan.

Xoog ku raridda ayaa intii mudda ahba loogu hanjabayay laguna sameynayay dadka barakacayaasha ah, iyadoo ay u muuqato in dadka naafada ah ay khatar dheeraad ah wajahayaan. Xaqqa uu qofka u leeyahay guri ku filan ayaa waxaa lagu aqoonsaday qodobka 11.1 ee Xeerka Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha Bulshada iyo Dhaqanka (ICESCR), oo ay Soomaaliya qeybka ka tahay. Si dowladda ay u fuliso waajibaadka ka saaran xaqqa guriyeynta, waa inay mudnaanta siisaa in qofwalba uu helo guri, tusaale ahaan iyadoo ka hortageysa isla markaana wax ka qabanaysa guryo la'aanta. Dowladda iyo saraakiisha bulshada, marka ay howlahooda gudanayaan waa inay mudnaanta siiyaan, kooxaha ugu nugul marka ay qeybinayaan kheyraadka, iyo inay damaanad qaadaan iyagoo aan kala sooceyn xaqqa ay dadka u leeyihiin inay ka qeyb qaataan isla markaana lagala tashto go'aanada noloshooda saameynayo. Waa in si wax ku ool ah wax looga qabtaa markii xuquuqdaasi lagu xadgudbo. Dowladda iyo kuwa matalaya waa inay iska ilaaliyaan ayna ka hortagaan xoog ku raridda, ayna xaqiijiyaan in arrintaa la dhowro. Waxaa taasi qeyb ka ah, in si dhab ah loola xaajoodo dadka la rari rabo oo la eego dhammaan wadooyinka furan ee macquulka ah, in muddo macquul ah loogu sii sheego raritaanka, xaqqa ay u leeyihiin inay racfaan ka qaataan raritaanka, [30]iyo inay helaan guriyeyn ku filan oo badal ah, oo ay ku heli karaan adeegyada asaasiga ah sida, biyaha iyo musqulaha, oo ay helaan dadka aan awoodda u laheyn. Raritaanku waa inuu mar kasta noqdaa tallaabada ugu dambeyso, mana ahan in raritaanku uu dadka ka dhigo hooy la'aan.[31]

ASKARTA KU DHAAWACANTAY DAGAALADA

Amnesty International ayaa ka walaacsan warar sheegaya in Wasaaradda Difaaca ay shaqada ka fiirinaysay askar ku dhaawacantay kuna naafoobay iyagoo howshooda gudanaayo. Xubnaha Amnesty International ayaa wareysteen afar askari oo Wasaaradda shaqada ka joojisay bilowgii 2014-kii. Waxa ay ka hadleen sida ay shaqadooda u sii wateen kaddib markii ay dhaawacmeen, iyagoo aanan furinta geli jirin balse tusaale ahaan tababari jiray ciidammada kale. Isaaq ayaa waxa uu ahaa taliye ka tirsan ciidammada xoogga dalka waxa uuna ka mid ahaan jiray ciidammadii dowladihii hore. Waxa uuna yiri: *"Xilli aan la dagaalamaynay kooxda Al-Shabaab sanadii 2011-kii, ayaa waxaan Muqdisho kaga jabay lugta. Markaa kaddib waxaan weli ka sii shaqeynayay ciidammada anigoo xubin ka ahaa ciidammada naafada ah. Waxaa dhammaanteen naloogu yeeray Muqdisho waxayna noo sheegeen in aanay rabin dad naafa ah. Waxay doonayaan dad ka qeyb qaadan kara dagaalada oo aan naafo*

---

[30]Guddiga Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Faallada Guud 7(Xoog ku raridda iyo Xaqqa guriiyeynta ku filan), faqrada 16.

[31]Guddiga Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Faallada Guud 7(Xoog ku raridda iyo Xaqqa guriiyeynta ku filan), faqrada 17.

aheyn. Laga bilaabo maalinkaas wax xuquuq ah kuma aanan lahayn Soomaaliya. Mushaar nalama siiyo xuquuqna ma lihin. Arrintaas ayey saameysay boqolaal qof oo mushaar la'aan iyo cunno la'aan noqday."

Cali waxa uu ku biiray ciidammada qalabka sida 1974-tii, wuxuuna naafo noqday isagoo dagaalamaya 1994-tii. Waxa uu u sheegay xubnaha Amnesty: *"Markii uu Cabdullaahi Yuusuf awoodda la wareegay, [32]ayaa waxaan dib ugu soo laabtay milateriga anigoo tababare ah. Dhammaanteen waxaa nalaga bixiyay ciidammada 2014-kii. Waxaa naloo sheegay in ciidammada ay u baahan yihiin inay la dagaalamaan Al-Shabaab, marka nalooma baahnayn. Waxa ay igu diideen maadaama aan naafo ahaa."*

Xuseen ayaa ka hadlay dareenkiisa ku aadan in dowladda ay ka saartay ciidammada: *"Waxaan ahay kabtan ka tirsanaa askartii 77.*[33]Waxaan dib ugu soo laabtay ciimmada markii uu Cabdullaahi Yuusuf la wareegay awoodda. Dhaawaca waxa uu isoo gaaray markii ay Al-Shabaab qabsatay Muqdisho (2009). Markaasi waxaan ahaa taliye unug, oo waxaan horkacayay 95 askari. Al-Shabaab ayaa qarax nala beegsatay sidaa ayaanan ku waayay lugtaydii. Hadda dowladda waa ay iga dhaqaaqday, waxaana dareemayaa ammaan la'aan. Waxaan ahaa kabtan nambarkiisa la yaqaan. Cabsida ugu weyn ee na haysa ayaa ah aargoosi nooga yimaado Al-Shabaab. Codsi ayaan u dirnaa dowladda Soomaaliya balse waxba nalooma qabto. Kaalmo ayaan waydiisannaa balse waxba nalooma qabto."

Askartii hore ayaa u sheegatay Amnesty International in boqolaal askari iyo rag magac ku dhex lahaa ciidammada ay mudaharaad ka hor dhigeen Madaxtooyada 8-dii bishii Febraayo 2014-kii, qiyaastii laba todobaad un kaddib markii shaqada laga joojiyay.[34] *"Waxaan ku hor mudaharaadnay Madaxtooyada. Waxaan la hadalnay dowladda. Waxay noo sheegeen in xilligaasi aysan jirin fursad ay nagu caawin karaan. Waxaa naloo sheegay in haddii ay helaan ay na siin doonaan $100 bishii oo*

---

[32] Cabdullaahi Yuusuf Axmed waxa uu ka mid ahaa saraakiishii ugu horreysay ee Ciidammada Qaranka Soomaaliya (SNA) markii ay Soomaaliya xoriyadda qaadatay 1960. Waxa uu ahaa taliye ciidan dagaalkii Ogaadeeniya ee 1977, kaddibna waxa uu dowr muhiim ah ka qaatay sameyntii jabhaddii ugu horreysay ee Soomaaliya ee loo yaqaanay (SSDF) ee mucaaradka ku aheyd xukuumaddii Siyaad Barre. 1998-dii waxa uu noqday madaxweynaha maamulka Puntland, 2004-kiina waxaa loo doortay inuu noqdo Madaxweynaha Dowladda Federaalka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya (TFG), oo aheyd maamul federaal ah oo kumeelgaar ah uuna qeyb ka ahaa dhismaheeda.

[33]Askartii 77 waxaa loola jeedaa kuwii ka qeyb qaatay dagaalkii 1977 ee dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya ee salka ku hayay gobolka Ogaadeeniya ee dalka Itoobiya (waxaa sidoo kale oo yaqaan dagaalkii Ogaadeeniya). Askarta Soomaalida ah ee ka qeyb qaadatay dagaalkaasi ayaa Soomaaliya gudaheeda lagu qadariyaa dowrkii ay ka qaateen dagaalkaasi, waxaana loo yaqaanaa askartii 77. Si macluumaad dheeraad ah aad uga ogaato dagaalkii Ogaadeeniya, eeg Ken Menkhaus, Dagaalka Soomaaliya: Ujeedla iyo Ciddii waday, Janaayo 2005, bogga 9. Waxaa laga heli karaa:http://siteresources.worldbank.org/INTSOMALIA/Resources/conflictinsomalia.pdf (Waxaa la eegay 21.02.2015).

[34]Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho eeg Zegabi East Africa News, Askar Soomaali ah oo shaqada laga joojiyay oo dibadbax ka sameeyay magaalada Muqdisho, 10 Febraayo 2014, waxaa laga heli karaa:http://www.zegabi.com/articles/7324 (Waxaa la eegay 16.02.15).

aanay ku jirin wax cunno ah. Markii hore bishii waxaa nala siin jiray $200 iyo cunno." Waxa ay intaa ku dareen in markii dhowr bilood la joogaba ay helaan $100 oo aanay helin caawinaad raashin.

Askartii hore oo matalaysa 270 askari oo shaqada laga joojiyay ayaa 24-kii Janaayo ee 2015-kii warqad u qoray Maxkamadda Sare ee Gobolka Banaadir, iyagoo ka cabanaya qaabka ay Wasaaradda Difaaca ula dhaqantay, inkastoo aanay gudbin kiis sharciyeed maadaama ay sheegeen in aanay dhaqaalaha ku bixi lahaa haysan: *"Ma filayno wax jawaab ah, waxaan nahay boqolaal qof, ciidammada waan u dhimmanay. Markii aan dagaalami karnay waa ay na rabeen; markii aan naafoownay waa ay inaga tageen."* Sida ay sheegeen askarta, dowladda kama aanay helin wargelin rasmi ah oo ku saabsan shaqo ka fariisintooda.

Bilihii Febraayo iyo Maarso ee 2015-ka, Amnesty International ayaa jawaab ku aaddan eedaymaha la soo jeediyay ka raadisay Wasaaradda Difaaca. Amnesty International ayaanan wax jawaab ah helin xilliga la sameynayay daabacaadan, waxaanay rajaynaysaa inay wadaxaajood ka sameyso arrinta.

IS ABAABULIDDA SI AY XUQUUQDOODA U HELAAN

Kooxa kala duwan oo ah dadka naafada ah ayaa isu abaabulay si ay ula hadlaan dowladda oo ay xuquuqdooda u helaan. Qaar ka mid ah ayaa dibadbaxyo sameeyay dhowr jeer iyagoo isku dayay inay helaan xuquuqdooda. Amnesty International ayaa looga warramay laba dibad bax oo dhacay 8-dii iyo 22-kii bishii Diseembar ee 2014-kii, kuwaasi oo looga cabanayay sida aanay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya danta uga lahayn dadka naafada ah.[35]Yuusuf[36] ayaa u sheegay xubnaha Amnesty International in qaar ka mid ah dadka naafada ah ay dhibaatada haysata kala hadleen dowladda ayna Wasaaradda Arrimaha Gudaha u ballanqaadday kaalmo, taasoo aanay weli helin xilliga warbixintan la qorayay.[37] Waxay dibadbaxeen iyagoo muujinaya sida ay uga niyadjabsan yihiin in dowladda aanay wax daryeel ah siinin dadka naafada ah.[38]

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxaa waajib ka saaran inay horumariso, ilaaliso oo ay xushmayso xuquuqda ay leeyihiin dadka oo dhan. Mas'uuliyadda horumarinta iyo ilaalinta ayaa waxa ay si gaar ah u taabanaysaa dadka naafada ah. Dastuurka Federaalka ee kumeelgaarka ah ayaa damaanad qaadaya xaq siman oo ay sharciga hortiisa ku leeyihiin dadka naafada ah, waxaana uu si muuqdo u mamnuucayaa in dowladda ay faquuqdo dadka naafada ah.[39]Waxaa jira qodob dheeraad ah oo xaqiijinaya in "Dadka naafada ah ee loo geystay faquuqa ay helaan kaalmada ay u baahan

---

[35]Sida aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg http://www.unsom.org/2014/12/08/december-8-2014-daily-monitoring-report/ (Waxaa la eegay 16.02.15).

[36]Xubin ka tirsan urur dadka naafada aha, sida lagu qeexay kor bogga 2.

[37] Wareysi: Xubin ka tirsan urur dadka naafada aha, 31.01.15. Qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga.

[38]Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeghttp://www.unsom.org/2014/12/08/december-8-2014-daily-monitoring-report/ (Waxaa la eegay 16.02.15).

[39] Dastuurka kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, 1 Agoosto 2012, Qodobka 11(1, 3); waxaa laga heli karaa http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=RkJTOSpoMME= (Waxaa la eegay 16.02.15).

yihiin si ay u xaqiiqsadaan xuquuqdooda dhaqaale iyo bulshaba. [40]Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa sidoo kale go'aansatay dowlad loo dhan yahay, taasoo muhiim u ah xaqiijinta in danaha dadka naafada ah la matalo.[41]

Sikastaba, ballanqaadyadaasi ayaanan weli la fulin, taa badalkeedana dadka aadka u nugul ayaa waxa ay la kulmaan xadgudubyo iyo faquuq. Ma jiraan shuruuc iyo siyaasado qaran oo khuseeya dadka naafada ah, sidoo kale ma jiro hannaan qeexaya faquuqa ay gaystaan dadka aan dowladda ka tirsanayn ama kala sooca noocyada kala duwan ee naafanimada. Ma jiraan shuruuc ogolaanaysa helitaanka adeegyada, dhismooyinka, macluumaadka iyo xiriirka dadka naafada ah. Waxaa intaa dheer in meesha laga saaray xuquuqda dadka naafada ah, baahidooda iyo walaacooda gaarka ahna la iloobay. Maxamuud waxa uu ka tirsan yahay urur ay leeyihiin dadka naafada ah. Waxa uu u sheegay xubnaha Amnesty International: *"Dadka naafada ah waa kuwo gebi ahaanba la dayacay. Dalka uma diyaarsano dadka naafada ah. Waddooyinka ma ahan kuwa ay isticmaali karaan, oo malahan meel gooni ah oo ay maraan. Waxay dhibaatooyin ka soo gaaraan dagaalada. Dalkani meel ugama bannaana dadka naafada ah*."[42]

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa sameysay ballanqaadyo badan oo ah inay dastuurka ku dhameystirayso Diseembar 2015-ka, ka hor doorasha qaran ee la qorsheeyay 2016-ka. Ballanqaadkii ugu horreeyay ayaa qeyb ka ahaa Heshiiskii Soomaaliya ee lagu saxiixay magaalada Brussels 16-kii bishii Sibteembar ee 2013-kii.[43]Dowladda Federaalka ayaa ku xaqiijisay ballanqaadkaasi 'Hiigsiga 2016-ka' ee la saxiixay bishii Febraayo ee 2014-ka,[44] iyo sidoo kale Madasha Iskaashiga Heerka Sare ah ee lagu qabtay magaalada Copenhagen bishii Nofeembar ee 2014-kii.[45] Inkastoo ay

---

[40] Dastuurka kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, 1 Agoosto 2012, Qodobka 27; waxaa laga heli lahaa http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=RkJTOSpoMME= (Waxaa la eegay 16.02.15).

[41] Tusaale ahaan: Dastuurka kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, 1 Agoosto 2012, Qodobka 1(1,), Qodobka 3(3), Qodobka 11B(4); waxaa laga heli karaa http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=RkJTOSpoMME= (Waxaa la eegay 16.02.15); sidoo kale eeg ballanqaadyada ku xusan Heeshiiska Soomaaliya ee Yoolka Koobaad ee Nabadda iyoy Qaran Dhiska: Siyaasad loo dhan yahay, bogga 5. Waxaa laga heli karaa http://www.pbsdialogue.org/The%20Somali%20Compact.pdf(Waxaa la eegay 16.02.15).

[42]Wareysi: Xubin ka tirsan urur dadka naafada aha, 31.01.15. Qoraalka wuxuu la yaallaa qoraaga.

[43] Soomaaliya ayaa ku go'aansatay arrinkan yoolka koobaad ee nabadda iyo qaran dhiska, halka Yoolka labaad: Dhamaystirka iyo Ansixinta Dastuurka Federaalka ah ee Diseembar 2015. Eeg Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, Heshiiska Soomaaliya bogga 5. Waxaa laga heli karaa http://www.pbsdialogue.org/The%20Somali%20Compact.pdf (Waxaa la eegay 16.02.15). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg WAR MURTIYEEDKA HESHIISKA CUSUB EE SOOMALIYA, EE SHIRKII BRUSSELS,16 SIBTEEMBAR 2013, waxaa laga heli karaa http://www.pbsbdialogue.org/Somali%20New%20Deal%20Conference%20-%20Communique.pdf (Waxaa la eegay 16.02.15).

[44]Hiigsiga 2016: Hannaanka waxqabadka, Muqadishu, Soomaaliya, Febraayo 2014, bogga 2.

[45]War murityeedka Madasha Iskaashiga Heerka Sare ee Copenhagen, 19-20 Nofeembar 2014, Qodobka 8, waxaa

dowladdu ka gaabisay ballanqaadyadaasi ay dib u eegista ugu sameynayso dastuurka kumeelgaarka ah, ayaa hannaankaasi dib u eegista dastuurka waxa ay fursad u tahay xaqiijinta ka qeybgalinta dadka naafda ah, iyo in qodobo ka hadlaya difaac dheeraad ah oo ay helaan dadka naafada ah lagu daro dasstuurka cusub.

Xuquuqda dadka naafada ah ayaa waxaa lagu ilaaliyay sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ka midka yihiin Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Bulshada iyo Siyaasadda,[46]Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka,[47] iyo Heshiiska ka dhanka ah Jirdilka iyo Ciqaabaha kale ee Arxandarrada ah ee ka Baxsan Bini'aadamnimada.[48]Soomaaliya ayaa qeyb ka ah heshiisyadaasi waxaana ay mas'uuliyad ka saaran tahay horumarinta, ilaalinta iyo xushmeynta xuquuqda dadka naafada ah. Bishii Janaayo ee sanadkan 2015-ka, Soomaaliya ayaa saxiixday Heshiiska Xuquuqda Carruurta kaasoo qeexaya qodobo addag oo ku saabsan dadka naafada ah. Waxaa intaa dheer in Soomaaliya oo xubin ka ah Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay ay saxiixday Shuruucda Qaramada Midoobay ee dadka Naafada ah lagu siinayo fursado la siman kuwa ay helaan dadka kale.[49] Inkastoo shuruucdaasi u degsan Qaramada Midoobay aanay sharci ahaan qasab ahayn, haddana waxay u taagan yihiin ballanqaad siyaasadeed iyo damiir addag oo wax looga qabanayo xaqiijinta in fursado siman ay helaan dadka naafada ah. Waxaa nasiib darra ah in heerarkaasi aanan la gaarin.

Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah ayaa waxa uu qeexayaa qodobo kadhigaya dadka naafada ah kuwa la siman dadka kale, ayna yihiin xubno firfircoon oo bulshada ka tirsan.[50] Waxa uu xaqiijinayaa heshiiskan in dhammaan xuquuqda aadanaha ay si siman u khuseeyaan dadka qaba dhammaan noocyada naafanimada.[51] Soomaaliya kama mid ahan dalalka saxiixay heshiiskaasi ama hannaanka badalka u ah, waana inay mudnaanta siisaa saxiixidda heshiiskan iyo heshiisyada kale ee muhiimka ah sida Heshiiska Baabi'inta Dhammaan Noocyada Faquuqa ee ka dhanka ah Haweenka.

Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah ayaa waxa uu horumarinayaa in firkir wanaagsan laga qaato dadka naafada ah. Waxa uu xoojinayaa kaalinta ay dadka naafada ah ku leeyihiin isbadelka iyo inay yihiin xubno firfircoon oo ka tirsan bulshada rayidka ah oo aanay ahayn aalad lagu tuugsado. Inta

---

laga heli karaa http://www.hlpfcopenhagen.dk/files/media/cph_communique-2014.pdf (Waxaa la eegay 16.02.15).

[46]Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Siyaasadda iyo Rayidka, 1966, waxaa laga heli karaa http://www.ohchr.org/en/professionalinterest/pages/ccpr.aspx (Waxaa la eegay 16.02.15).

[47] Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, 1966, waxaa laga heli karaa:http://www.ohchr.org/EN/ProfessionalInterest/Pages/CESCR.aspx (Waxaa la eegay 16.02.15).

[48]Heshiiska ka dhanka ah Jirdilka iyo Ciqaabta Arxandarrada ah ee ka baxsan Bini'aadamnimada, 1984, waxaa laga heli karaa http://www.ohchr.org/EN/ProfessionalInterest/Pages/CAT.aspx (Waxaa la eegay 16.02.15).

[49]Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, ee Xeerka Isla simidda Fursadaha ay helaan Dadka Naafada ah iyo kuwa kale, qaraarka 48/96, lifaaqa, 20 Diseembar 1993.

[50] Heshiiska Xuquuqda Dadka naafada ah ee la dhaqan galiyay 3 Mey 2008.

[51]Eeghttp://www.un.org/disabilities/default.asp?id=150si aad u hesho faafaahin dheeraad ah (Waxaa la eegay 16.02.15).

badan dadka naafada ah ee ay Amnesty International la hadashay ayaa xaqiijiyay in taasi ay tahay waxa dhabta ah ee ay noloshooda ka rabaan. Anisa ayaa tiri: *"Naafanimada ma ahan habaar, balse dadka wax xun ayey naga sheegaan naafanimada owgeed."* Xuseen ayaa sheegay: *"Inta badan Soomaalida waxay u maleeyaan in dadka naafada ah aanay waxba qabsan karin, oo aanan nafteenna wax u tari karin. Waxaan dareemaynaa niyad jab, waxaan awoodnaa inaan wax qabsano, balse ma ay jirto cidd fursad ina siisay. Cidna uma dagaalanto xuquuqdeenna."* Waxa uu intaa ku daray: *"Waxaan idinka rabnaa in aad cabashadanada u gudbisaan caalamka, si la isugu dayo in naloo caawiyo."*

Gobalada kale ee Soomaaliya, sida Somaliland iyo Puntland, ayaa horumar ka sameeyay arrinta dadka naafada ah, waxayna wadaan hannaan ay ku sameynayaan siyaasado ku aadan dadka naafada ah.

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay fursad u haysataa inay muujiso go'aankeeda ay ku horumarinayso nolosha dadka naafada ah iyo tallaabooyinka ay ku xaqiijinayso in dadka naafada ah ay si buuxdo u heli karaan xuquuqdooda.

TALO BIXIN:

DOWLADDA FEDERAALKA AH WAXAA LOO SOO JEEDINAYAA:

- Xaqiijinta in barakacayaasha gudaha, gaar ahaan kuwooda naafada ah ay difaac ka helaan dowladda, si waafaqsan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, iyo go'aamada ku cad nidaamka barakacayaasha gudaha;

- Xaqiijinta in dadka naafada ah la siiyo fursado ay kaga qeyb galaan hannaanka go'aan qaadashada, gaar ahaan kuwa saameynaya, oo uu ka mid yahay dib u eegida dastuurka ee socota, iyo diyaarinta shuruucda iyo siyaasadaha, bixinta adeegyada, dadaalada dowladda ee ku aaddan dadka naafada ah si waafaqsan axdiyada caalamiga ah;[52]

- Sameynta shuruuc qaran oo ballan-qaadaya inilaalin dheeraad ah loo sameeyo dadka naafada ah, shuruucdaasi oo waafaqsan heerarka caalamiga ah, iyo nidaam qaran oo lagu xaqiijinayo in ballan-qaadyadaasi la dhaqan geliyo;

- Mudnaan-siinta bixinta adeegyo haboon oo la heli karo, oo ay helaan dadka naafada ah, taasoo waafaqsan go'aanka dowladda Soomaaliya ee ah in dadka ay si siman u helaan xuquuqdooda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, iyaga oo aan la kala sooceyn. In sida ugu sareysa loo adeegsado kheyraadka jira, oo ay ka mid tahay in lala kaashado caalamka, si loo gaaro xaqa guryeynta ee dadka ku filan, iyada oo mudnaanta la siinayo dadka naafada ah, iyo kuwa u nugul faquuqa;

- Inay qaado xog ururin wax ku ool ah oo ku aadan tirada iyo xaaladda ay ku sugan yihiin dadka

---

[52]Heshiiska Soomaaliya ee Yoolka Koobaad ee Nabada iyo Qaran dhiska: Siyaasad loo dhan yahay, bogga 5. Waxaa laga heli karaa http://www.pbsdialogue.org/The%20Somali%20Compact.pdf (Waxaa la eegay 16.02.15).

naafada ah, oo uu ka mid yahay tirakoob hadda socda ama mid musqabalka la filayo, si loola socdo jawaabaha siyaasadeed iyo kuwa sharciyeed ee haboon isla markaana wax ku oolka ah;

- Xaqiijinta tallaabooyin degdeg ah oo muhiim ah, si looga hortago dhammaan rarida qasabka ah, oo ay ka midka yihiin dadka naafada ah.

- Saxiixida heshiiska xuquuqda dadka naafada ah, iyo hannaanka badalka u ah;

- Xaqiijinta xiriir muhiim ah oo wasaaradaha ka jira, gaar ahaan xafiiska Ra'iisul Wasaraaha si loo hubiyo in dadka naafada ah ay heli karaan xaqooda;

- Xaqiijinta xiriir muhiim ah oo ka dhex jira gudiga xuquuqda aadanaha ee mustaqbalka la sameynayo, si loo hubiyo in dadka naafada ah ay heli karaan xaqooda;

- In martiqaad furan loo sameeyo Qaramada Midoobay iyo Gudiga Afrika u qaabilsan xuquuqda aadanaha iyo baaraha gaarka ah ee xuquuqsa dadka;

HOWLGALKA MIDOWGA AFRIKA EE SOOMAALIYA (AMISOM) WAXAA LOO SOO JEEDINAYAA

- Inay Mudnaanta siiyaan sameynta qaab lagu tixraaci karo dhibaatada shacabka soo gaarto, si waafaqsan qaraarada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee kala ah 2093 (2013) iyo 2124 (2013) iyo qaraarada lagu xoojiyay ee kala ah 2158 (2014) iyo 2182 (2014), ee ku kala go'ay naafannimada.

BEESHA CAALAMKA WAXAA LOO SOO JEEDINAYAA:

- Inay dowladda Federaalka Soomaaliya kala shaqeyso tallaabooyinka ay u qaadeyso sidii ay u saxiixi lahayd heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada ah;

- Inay dowladda Federaalka ee Soomaaliya ka caawiso sameynta shuruuc iyo siyaasaddo qaran oo lagu xaqiijinayo hormarinta iyo xushmeynta xaqa sinaanta ee dadka naafada ah;

- Inay fududeyso in ururada dadka naafada ah ay si wax ku ool ah ula shaqeyso dowladda Federaalka ah marka la gaarayo go'aannada, gaar ahaan kuwa saameynaya, tusaale ahaan, sameynta shuruuc, siyaasado, bixinta adeegyo, iyo qaabka ay dowladda u wajaheyso dadka naafada ah.

HAY'ADAHA SAMAFALKA WAXAA LOO SOO JEEDINAYAA:

- Xaqiijin in adeegyadooda bani'aadannimo ay si siman u helaan ragga, haweenka, wiilasha iyo gabdhaha qaba noocyada kala duwan ee naafanimada ah, iyo in caawimaad dhanka dhaqancelinta ah loo fidiyo kuwa u baahan;

- Taageerida dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya si ay u dhisto awoodda dadka naafada ah;

- Xaqiijiilaalin siman oo dadka naafada ah looga ilaaliyo dhibaatada ama xadgudubyada.